Kastaa kastaa sina qunux khasaarayaasha, bilaa kilaankil.

Hadii ciwaanka qormadani luqad aanad maqal iyo kugu noqdo far aan jirin, iyagaa tilmaantiyo, waxa looga jeediyo macneheeda sheegiye carruurteena weydii. Maykal hees u qaadoo, laxan wacan la saaroo London laga tumaayiyo, inaanay maahmaah iyo ahayn heello Faransiis, anaa taana kaa huba. Af soomaaligeenoo lagu badhxay ka Finland, iyo inaanu Oromiyo ahayn weedho fadhata ah, cadayntiisii baa taal. Waa ciyaar qadiimiya, batarkaynu tumaniyo, mana aha seylici. Xeerarkii jabadaantiyo, ma qabtaan kuwii jagidu. Markay kala fogaataa la adeegsadaayoo, waa distoorkii Fataatiirta.

Ummad kastaa waxay leedahay luqad ay isku af gartaan oo u ah afkooda hooyo, waana hantida ma guurtada ah ee aanay abaar, colaad iyo cadaadis midna tirtiri karin. Burburkii Somalia awgeed ayaa dad badan oo reer Somaliland ahaa, kuna noolaa Somalia ay dib ugu soo noqdeen dalkoodii hooyo, sidoo kale dad Somalia u dhashay ayaa door biday inay ka faa´iideystaan nabada iyo nidaamka Somaliland yaal. Dadka soo guryo noqday iyo kuwa kaleba waxay jecel yihiin in iyaga iyo luqadoodaba la qarameeyo.

Digtoorradii ka qallin jabiyey Lafoole, masuuliyiintii kasoo shaqeeyey mashruucii korontada Faanoole iyo hawl wadeenadii warshedii sonkorta Madheedhley, intuba waxay lasoo guureen nidaamkii iyo luqadihii lagaga hadli jirey goobahaas. Inkastoo aanan kamid ahayn dadkii codsiyada shaqo u diray digtoorradaa, jacayl Xamar i geeyaana igu dhicin hadana. Miyaad sonkortii Madheedhley, xamaaliin rogeysiyo, tukaan miisay aragteen ?. Miyaad mashruucii korontada, magaalooyin badanoo, mugdi wada ahaabaa, la siiraaday maqasheen ?.

Markaan akhristay qaar kamida farriimaha akhristayaasha oo ku qoran wargeysyada dalkii ka soo baxa, amma dhegeysto xayaysiisyada cajaladaha lagu duubay Somaliland oo la isticmaalayo kelmedo iyo odhaahyo soo geleyti ah, ayaa waxan isku qanciyey inay tahay mashaariicda dhaxal galka ah ee ay fuliyeen hawl wadeenadii Madheedhley iyo Faanoole kasoo shaqeeyey. Inkastoo murtidii afkeenu gaadhay meel kasta oo kamid ah dhulka somalidu degto, hadana muwaadiniinta soo galay, maahmaaho qoran iyo murti waxay lasoo qexeen, qubka moosku qashin waaye !!!

Boqortooyo aad qadiimi u ahayd ayaa waxay furtay goob magtabad ah oo wax lagu akhristo, waxna lagu dhegeysto. Dhammaan qoraallada iyo cajaladaha goobta lasoo dhigay ayaa waxay ku saabsaanayeen taariikhda iyo dhacdooyinkii kala duwanaa ee soo maray boqortooyada sannadihii 1820-1920. Qoraallada ayaa waxa ku jirey heshiisyo xasaasi ahaa oo ay boqortooyadu la gashay dalal kale. Sidoo kale waxa ku jirey amarro iyo wareegtooyin xil magacaabis iyo ka qaadisba leh.

Magtabada oo u furnayd qof kasta oo raba inuu booqdo ayaa waxa mamnuuc ka ahaa in qoraallada iyo cajaladaha meesha yaal wax koobi ah laga qaato. Waxa iyaduna mamnuuc ahayd in qoraallada iyo cajaladaha wax lagu kordhiyo amma laga masaxo. Si arrintaa loo xaqiijiyo ayaa waxa la shaqaalaysiiyey laba nin, iyadoo mid shaqadiisu ahayd inuu dul joogo, oo uu isha ku hayo qofkan wax akhrinaya si aanu wax qoraala ugu kordhin amma uga masixin. Sidoo kale ayaa ninka kalena shaqadiisu ahayd inuu dul taagnaado qofka wax dhegeysana.

Si loo hubiyo in nimankan la shaqaalaysiiyey daacad u yihiin shaqadooda, xilna iska saarayaan ilaalinta taariikhdooda, dhaqankooda iyo luqadooda qadiimka ah, ayaa waxa loo diray nin soo hubiya arrintaa. Ninka la diray ayaa waxa amar lagu siiyey inuu qoraal qoraallada kamid ah kelmed ka badalo, sidoo kale cod codadka kamid ahna weedh ku dul duubo. Nimankan shaqaalaha ah oo malaha saacadaha shaqadooda mooyee waajibaadkii dalkooda iyo dadkoodaba illaaway ayaa waxa u yimi ninkii loo soo diray.

Ninka oo muwaadin caadi ah iska soo dhigay ayaa wuxuu galay qaybtii qoraallada. Intuu ninkii ilaalinayey iska eegay, arkayna inuu ku foojigan yahay saacad dhalaasha oo gidaarka sudhnayd ayuu qoraal ahaa (Waxan la hadlay) intuu masaxay ku badeley (Waxan wacay). Markuu hawshiisii dhammaystay ayuu intuu faylkii isku laabay qaybtii cajaladaha u gudbay. Ninka kale ee jooga qaybta cajaladaha oo ay isna sidii ninkii hore kaga dhegtay saacadan gidaarka sudhan, ayuu u yimid.

Markuu cajaladihii cabaar dhegeystay ayuu markii dambe soo saaray qudbad uu jeediyey boqor boqorradii hore kamid ahaa, oo aadna u necbaa in la isticmaalo kelmadaha iyo odhaahyada afafka shisheeye. Kelmed uu boqorku ku bilaabi jirey qudbadihiisa oo ahayd walaalayaal ayuu wuxuu ku dul masaxay ”Jaallayaal”. Markuu taana ku guuleystay, arkayna inay dadkii taariikhdan, xogtan iyo suugaantooda ilaashan lahaa ku foojigan yihiin maalmaha iyo saacadaha wareega ayaa wuxu isku deyey inuu xaqiijiyo arrintaa.

Intuu qolkii kasoo baxay, una banneeyey qofkii isaga ku xigay ayuu wuxuu isku deyey inuu saacadii gidaarka sudhnayd daqiiqado dib u celiyo. Nimankan oo damiirkoodu, daqiiqado ku xidhan yahay, balse aan dalkoodiyo, suugaantooda dahabka ah, garanayn difaaca, ayaa markiiba kusoo booday. Intay labadooduba ninkii ku soo ordeen ayey ku yidhaahdeen waa mamnuuc inaad saacadan wakhtigeeda bedesho. Ninka oo ka warqaba, faa´iido darrada nimankan, fariidada isku haysta ayaa intuu soo saaray aqoonsigisii ku yidhi. Hadaan saacadan daqiiqado hore u dhigo, aad ayey u

fududahay in la saxo qaladkeeda, balse hadii aan qudbadii la jeediyey 1880 wax ka masaxo, aad ayey u adag tahay in hadalkaa dib loo helo.

Iyadoo aanay maanta jirin laamo u qaybsan kaydinta iyo la socodka isbedelka luqadeena hooyo, qeexana kelmedaha soo geleytiga ah, hadana inaynu soo urursano oo aynu qaramayno odhaahyo iyo kelmedo aynaan asal u lahayni waa arrin saamaynteeda leh. Waxa hiil wanaagsan noqon lahaa hadii dhammaan wargeysyada dalka kasoo baxa, idaacadaha ka hawl gala iyo bogaga internetkuba iska durkiyaan daabacaada iyo qaramaynta kelmadaha soo geleytiga ah. Waxan rajeynayaa inaanu bar tilmaameedkeenu noqon saacadii gidaarka sudhnayd iyadoo suugaantii lumayso.

Adigoon xoolahaagiyo, xuduntii carruurnimo, Xamar weyn ku aasnayn. Oo aanu xididkiyo, xigtadaada idilkeed, Boolli qaran ku xeernayn. Maxaa Geedi Baabow, qardhaastiisa kuu xidhaya ?.

Abdirahman Hassan Yey
Daruuraha1@hotmail.com
Finland